

# Xaashida Xogta Xeerka Cuntada #34

Waxay tahay inaad ka ogaato xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG/  
FOODSAFETY

## Shaqooyinka Waxyaabaha Ku Yaala Maqaayadaha Cuntada Wareegta

**OAR 333-162-0020, SHURUUDAHA GUUD**  
Si kastaba ha noqotee OAR 333-150-0000 Qaybta 5-305.11 (D) iyo qayb hoosaadyada (a) iyo (b) ee qaybtan, dhamaan shaqooyinka iyo agabka waa inay qayb ka yihiin maqaayadda cuntada wareegta.

**OAR 333-150-0000, CUTUBKA 5-305.11 Shuruudaha Nidaamka Biyaha.**  
(C) Dhamaan maqaayadaha cuntada wareega waa inay la socdaan taangiyada biyaha la cabbi karo iyo kuwa wasakhda ah. Guriga wareega waxaa lagu xidhiidhin karaa biyaha iyo bulaacada hadii laga heleyo meesha lagu shaqaynayo, laakiin, taangiyadu waa inay gaadhiga saarnaadaan mar walba. Maqaayadda cuntada wareegta laguma xidhiidhin karo nidaamka biyaha nadiifta ah iyada oo aan sidoo kale lagu xidhiidhin nidaamka bulaacada la ansixiyay. Maqaayad cuntada wareegta oo liisan la siiyey wixii ka horeeyay Febraayo 1, 2020 oo taangiyada biyaha iyo qasabadaha xidhiidhka la leh laga saaray wixii ka horeeyay taariikhdaas looma baahna in dib loogu geliyo nidaamka biyaha hadii maqaayadda si sax ah loogu xidhiidhiyo nidaamka biyaha nadiifta ah iyo bulaacada ee la ansixiyay. PF

(D) Maqaayadda cuntada wareegta ee isticmaasha taangiyada biyaha la cabbi karo iyo biyaha wasakhda ah oo aan qayb ka ahayn maqaayadda waa in la joojiyaa isticmaalkooda taangiyadan ugu danbayn Janaayo 1, 2023. PF

### SABABO CAAFIMAADKA SHACABKA AH:

Gobolka oo dhan waxaa ka jira caqabado shayada aan ku xidhiidhsanayn ah ee dhulka yaala meelaha la dhigo maqaayadaha cuntada wareegta kuwaas oo abuura inay galaan cayayaanka iyo jiirku. Wixii maqaayadda wareegta laga dejinayaa waxay kordhiyaan khatarta faddaraynta iyo khalkhalka heerkulka ee cuntada.

Sidoo kale, taangiyada biyaha ee maqaayadda laga dejiyo waxay ku noqdeen mushkilad caafimaadka shacabka oo ah biyaha wasakhda ah oo daada iyo in si khalidan loogu daadiyo wasakhda meesha, taasi oo faddaraynta meelaha biyaha roobku ay maraan oo ay wasakheeyaan biyaha harooyinkeena iyo wabiyaasheena.

Oregon waxa u gaar ah in gaadiidka cuntada loo ogolaan karo inay ku shaqeeyaan bilaa jihayn hadii waaxda caafimaadka deegaanku ogolaato. Jihayntu waxaa weeye madbakh u haysta liisan weel maydhista, kaydintaa cuntada iyo cunto karinta. Hadii hawladeenku muujin karo inay dhamaan waxan oo dhan ugu samayn karaan si amaan ah maqaayadda cuntada wareegta, markaa waxaa loo ogolaadaa inay ku shaqeeyaan bilaa jihayn. Hawlwadeenku waa inuu wax kasta oo loo baahan yahay ay u xiriirsan yihiin ama maqaayadda gudaha ugu jiraan.

**“Xidhiidhinta” waxay ka dhigan tahay wax kasta oo la xidhiidha maqaayadda cuntada wareegta waa in uu ku xidhan yahay maqaayadda oo si wanaagsan loo xidhaa. La hadal kormeerahaaga caafimaadka deegaanka kahor inta aanad wax ku xidhiidhin ama aanad dhigin wax banaanka maqaayadda**

Tusaalayaasha shayada **aan** la ogolayn in laga dejiyo gaadhiga waa talaagada, barafeeyaha iyo taangiyada biyaha nadiifta ah/wasakhda ah.

Kuwan weligeed lagama ogolaan Oregon, laakiin xad gudubyan iminka waxaa la siiyaa mudnaan sare. Tani waxay awood u siisaa kormeerayaasha inay markaaba sharciga la tiigsadaan ciddii sidaan ku kacda.

Shayga kaliya ee laga soo reebaa waa in maqaayadda cuntada wareegta ee Darajada 4 ay yeelan karto **hal** aalad wax lagu kariyo oo gaadhiga laga dejiyo. Eeg [Xaashida Xogta #20](#) wixii macluumaad dheeraad ah.

Tusaalayaasha **wanaagsan** waa maadaama oo wax kastaaba uu yaalo gudaha ama uu ku xiriirsan yahay maqaayadda:



Tusaalayaasha **xun** waa maadaama oo alaab ay taalo banaanka:

